



# Dabaaldegga Xuska Bisha Sooyaalka Laatiinaha

Sebtembar 15, 2021

Qoysaska, Ardayda iyo Asxaabta Qaaliga ah,

Maanta waxaa bilaabantay Bishii Xusitaanka Sooyaalka Laatiinaha, taasi oo ah fursad sanadle ah oo loo dabaaldego iyada oo la aqoonsanayo awooda bulshadeena kala dhaqan gedisan-waqtigii hore, hadda iyo mustaqbalka.

Koritaankeygii Bay Area iyo Central Valley ee California, waxaan u mahadcelinayaa waayo-aragnimadeydii hore ee waxbarashada dugsiga oo xambaarsanaa aqbalaada fursadaha faraha badan ee dhaqanka iyo luqada oo wanaagsan. Aniga oo ahaa ilmo muhaajir Miksigaan ah, waxaan dareemay iyaga oo aan ka dareemay macallimiinteydii aniguna aan arkay milicsigii cashrada maalin walba iyo sheekooyinkii ay ila wadaageen. Waxaan ka helay waayo-aragnimo leh farxad aan la soo koobin karin.



Haddaba iyada oo aan muneeyno waxyaabaha aan la tiri karin ee Laatiinuhu ay ku soo kordhiyeen bulshadeena iyo jiilasha marka la eego qeyb kasta oo ka mid ah bulshada, waxaan rabaa inaan u mahadceliyo macallimiinta Laatiinaha ah, shaqaalaha iyo saaxiibada bulshada kaalinta aad ku soo kordhiiseen iskuulada ee loo dhan yahay iyo soo dhaweynta waayo-aragnimada barashada koriinka ardayda PPS.

Bisha soo socota, gaar ahaan, bulshooyinka iskuuladeenu waxa ay u aqoonsan doonaan dariiqooyin hal-abuur leh oo ay ku sharfayaan, ku aqoonsanayaan iyo waliba ay ugu dabaaldegayaan sooyaalka Laatiinaha. Rajadeydu waxay tahay aniga oo ah Guddoomiyaha Waxbarashada iskuuladeena in mid kasta oo ka mid ah ardaydeenu haysto fursado fara badan oo la mid ah sida aniguna dhallinyarnimadeydii u helay, waayo-aragnimada aad dareemeyso sooyaalkaaga iyo inaad u dabaaldegto asalka iyo sidoo kale inaad wax badan ka barato oo ku saabsan bulshada kala gedisan ee aan la nool nahay. Fadlan waxaad ogaataa aniga oo ah hoggaamiyaha dugsiyada degmada ugu ballaaran Oregon, inay aniga ii tahay mudnaanta koowaad, iyo mas'uuliyad aynu dhammaanteen wadaagno, sii wadista inaynu qaadno tallaabooyin ku aadan diyaarinta ardaydeena, sida ay bulshadeenu ku soo tilmaantay aragtida dugsiyada degmadeena ee aqoonsiga waxyaabaha ku jira [Sawirkeena Qallin-jabinta](#).

Mahadsanidin,

Guadalupe Guerrero  
Guddoomiyaha Waxbarashada

*\*For a reference list of educational resources, please see:*  
[Latinx Heritage Month Teaching Resources to Use All Year Long](#)  
[Hispanic Heritage Month Resources | Latino Center](#)  
[Latinx Heritage Month Resources | Teach For America](#)  
[NPS Celebrates Hispanic Heritage Month, Educators Portal, and more](#)  
[Uplifting Hispanic Americans during Hispanic Heritage Month and Beyond](#)